# Golaha Wakiilladda

## Waaxda Hadal-qoraalka, Shuruucda iyo Daabacaada

### *Golihii 5aad ee Wakiillada, Kal-fadhiga 9aad ee Fadhigii 9aad*

***Wakhtiga 9:30* AM** ilaa **12:10 Am**
***Taariikhda: - Isniin 26*** August ***2024***

**Gudoonka: -** Md. Siciid Mire Faarax (Giire)

**Quranka: -** Md. Shiikh Siciid Sokeeye

**Ajandaha Fadhiga: - Doodda Xaalada Dalka ee Faragalinta Dawlada Soomaaliya**

***Gudoonka:-*** Mudanayaal waxaynu furanaynaa fadhigeenii caadiga ahaa, 51 mudane ayaa fadhiya, waa fadhigii 5aad ee kal-fadhigan 9aad, waxaynu ku furanaynaa Aayadaha quraanka ah oo waxa inoo akhrinaya *Md. Shiikh Siciid.*

Wuxuu mahadsan yahay *Mudane Shiikh Siciid*, Mudanayaal, sida aad ka warqabtaan ee aanu xalayna shir-gudoon ahaan ogaysiiska idinku siinay, waxa qarankan aynu u dhaaranay lagu soo qaaday dagaal kaga imanaya dawlada somaliya, kaas oo leh mid siyaasadeed, mid ganacsi iyo mid amni intaba, masuuliyad baa ka saaran Golaha iyo Mudanayaasha inay ka hadlaan waxyaabaha qaranimada iyo shacabkii ina doortay taabanaya, waxaanu u aragnay inkasto ay ka mid tahay ajandeheena waxyaabaha soo kordha inay xaaladaasi tahay mid aynaan indhaha ka qarsan karayn, inaynu u jawaabno cadawga somaliland iyo cadawga qarankani leeyahay, waxaanu u aragnay shir-gudoon ahaan inay tahay masuuliyad ina saaran oo ay tahay inaynu waajibkeena ka gudano.

Sida darteed, waxaan kalmad siin doona ***Gudoomiyaha Gudiga Arrimaha Dibada Mudane Maxamed Xasan*** bal si uu u soo jeediyo soo jeedinta ay hayaan, ka dibna, waxaynu ka furan doonaa dood, ka dib go'aan gole oo qaraar ayaan rabnaa inaynu ka soo saarno.

**Md. Maxamed Xasan Siciid Gudoomiyaha G. Arrimaha Dibada: -** Gudiga Arrimaha Dibada markii uu arkay Gardarooyinka, Hagardaamada iyo weerarka ay dawada Somalia ku soo qaaday jiritaanka, Madax-bannaanida iyo Horumarka dhaqaale iyo bulsho ee Jamhuuriyada Somaliland. Markii uu arkay Isku dayada abaabulan ee ay dawlada Somalia ku doonayso in ay ku majo-xaabiso dhaqaalaha iyo ganacsiga Somaliland. Markii uu arkay **Qodobka 1aad** ee Dastuukra oo sicad u tilmaamaya Madax-banaanida, karaamada iyo qaranimada Somaliland iyo **Qodobka 2aad Faqradiisa 3aad** oo sheegay in dhulka qaranka Somaliland yahay Muqaddas isla markaana yahay laguma xad-gudbaan.

Isagoo ka duulaya, **Qodobka 38**aad ee Dastuurka oo tilmaamaya in himilada Baarlamaanka ay ka mid tahay sugida nabad-galyada iyo Amaanka Jamhuuriyada iyo Madax-banaanida Maamulka Dhulkeed, Baddeeda iyo Hawadeeda jamhuuriyada Somaliland.

Wuxuu golaha u soo jeedinayaa arrimahan soo socda: -

1. Waxaa reeban laga bilaabo Taariikhda maanta ah in ay wax wada hadal ah ay yeeshaan Somaliland iyo Somalia.
2. Waxaa reeban in shirkad ka diwaan-gashan ama ka hawl-gasha Somaliland ay fuliso ama ay hir-galiso go'aan kasta oo ka soo baxa Somalia oo waxyeelo ku ah Madaxbanaanida, jiritgaanka Qaranimada iyo magacsamida Jamhuuriyada Somaliland.
3. Xeer-ilaaliyaha guud ee Qaranka waxaa waajib ku ah in uu talaabo sharci ah ka qaado shirkadda jabisa faqrada 2aad ee Qaraarkan.
4. Waxaa Golaha Wakiillada ee Jamhuuriyada Somaliland uu ogaysiinayaa Golaha Amaanka ee qaramada Midoobay in gardarooyinka ay soo qaaday Somalia ay ka dhiganyihiin Duullaan ayna xaq u leedahay Jamhuuriyada Somaliland in ay iska difaacdo (self-defense) si wafaqsan qodonka 51aad ee Axdiga qaramada midoobay (UN charter).
5. Golaha Jamhuuriyada Somaliland waxa uu ku wargalinayaa dhamaan shacabka Somaliland in ay u midoobaan difaaca qaranimada jamhuuriyada Somaliland

**Md. Xuseen Ismaaciil Jaamac (Budul)** *(3min, 23sec):* Bismilaahi Raxmaani Raxiim, Mudane Gudoomiye waad mahadsantahay, qodobka uu soo jeediyay Gudoomiyaha Gudidda Arrimaha Dibada ee ku saabsan gardarooyinka ah ee maamulka Muqdisho uu ku soo qaaday Somaliland, dhamaan qodobadaa soo jeedinta ah waan ku waafaqsanahay, waxaa kaliya ee aan ku dari lahaa si arrintu ay u yeelato miisaan, u yeelato culays iyo si ay u yeelato Go'aanadeeda masiiriga ah ama Dastuuriga ah, **Waxaan soo jeedin lahaa,** in fadhiga arrinta laga go'aan gaadhayaa uu noqdo mid ay labada gole isugu yimaadaan, si ay u noqoto mid lagu soo saaro garaar labada Gole ah, labada gudoomiyana arrintaa waan in ay sida ugu dhakhsaha badan uga shaqeeyaan.

Sidoo kale waxaan gudoomiye Maxamed siciid la qabaa in arrimaha taag-taagan imika oo aan ahayn shirkada ay Somalia ugu hanjabtay in ay kala noqonayso kalsoonida ganacsi, wax ka badan oo hore u soconayay ayaa jiray oo u baahnaa in mar horaba indho fayaw lagu eego.

Laga bilaabo maanta waxaan taladayda ku xoojinayaa, sida aad ka warhaysaan Somaliland iyo Somalia banaan ayaynu isugu soo baxnay oo 30kii sanno ee hore kolba geed iyo kayn ayaa la isugu soo war-wareegayay ee maanta bancadahaa ayaa la isugu soo baxay, taas oo u baahan in ninwalbaa tobtiisa iyo xeeladii uu ku guulaysan lahaa uu la yimaado, wax dambe oo la hadoolilaa ama la isku qariyaana meesha ma yaalaan.

Shacabka reer Somaliland waxaa laga doonaa mid nimo, xukuumada indho furan ayaa laga doonayaa oo wax kasta oo khuseeya dawlad nimada iyo system-ka Somaliland ah waxaa laga doonayaa difaac, Golahana waxaan filayaa in uu ka midaysanyahay, sidoo kale waan in golihii (Guurtida)kalana waa in la doonaa, arrinta Gudoomiyaha Arrimaha Dibadana waan ku waafaqsanahay, waxaan kale oo aan sii raacin lahaa hadii ay dooddu maanta dhamaan waydo in la soo waddo si go'aano wanaagsani uga soo baxaan. waad mahadsantihiin.

**Md. Xassan Saleebaan Dhuxul (Laabsaalax)** *(7min, 52sec): -* Shir-gudoonka iyo Mudanayaasha waxaan idinku salaamayaa Salaanta Islaamka ASC, soo jeedimaha ay soo kala jeediyeen Xildhibaan Maxamed Xassan iyo Xildhibaan Xuseen Ismaaciil waan ku waafaqsanahay.

Mudanayaal aragtiyaha kala duwan ee halkan laga soo jeediyo waxaan soo jeedinayaa in la weeleeyo si goluhu uu u gaadho qaraar.

Mudanayaal, xaaladaha qaarkood waxay inaga qarin karaan fursadaha, guulaha la taaban karo waxaa abuura dad garwaaqsaday dhibaatooyinka dabadeedna fursado u rogaya, waxaana la yidhaa "KHAYR WAXBA KUMA YEELEE SHAR U TOOGO HAYSO" sidaa daraadeed, dhacdooyinkii siyaasadeed iyo dhaqamadii siiyaasadeed ee ka soo hor jeeday mabaa'diida ganacsiga socodka iyo dhaqdhaqaaqa ee uu ku kacay maamulka aan iskii isku maamuli karayn ee muqdisho ka dhisani waa mid digtooni iyo baraarugsanaan shacabka Somaliland ugu filan.

Mudanayaal kooxaha xagjirka ah, sida aad la socotaan ee koonfurta Somalia ka dagaalamaa ee cadceedii dhacdaba qaraxyada iyo dilalka ka gaysanayaa shacabka aan waxba galabsan kulaynayaa, qarixii ugu danbeeyay ee ku beegsandeena uu ahaa kii Xeebta Liido, xukuumada ama maamulka ka taliya ama ka arrimiya Muqdisho in ka dhiidhiyo oo iska xoreeyo Alshabaab waxa uu ka doorbiday oo uu mudnaanta koowaad siiyay la dagaaalanka Shacabka Jamhuuriyada Somaliland uu la galayo.

Sidaa markay tahay, anigu waxaan u arkaa in dadka shacabka ahi ay laqabaan maamulkaa nacabka iyo cidiyo ku dagaalanka koodsaday ee Xassan Shekh iyo xulufadiisu ay u banbexeen, mudanayaal in juhdi taag iyo tamar la galiyo shirkadaha diyaaradaha in lagu qasbo in magaca Somaliland ay ka saran mareegahooda waa talaabo ka cimri dheer ficilkooda, maga Somaliland in meel laga Tirana waxaa ka weyn in uu quluubteena ku daabacanyahay. Midnimada beerta iyo afka baarkiisa ah ee maamulkaasi ka sheekeeyaan waa mid aanay waxba ka jirin oo maantaba cad.

Mudanayaal maamulka muqdisho ka dhisani ee aan awoodin in uu xasiliyo cashuurtana ka qaado 4$km^2$ ah in uu gudoonsado in uu Somaliland Deeqaha kula dagaalamo waa

taariikh xumo iyo tilmaan inoo sheegaysa halka aynu kala taaganahay, sida aad la socotaana ama aad ka wada dharagsantihiin mudanayaal maalmihii ugu danbeeyay waxay soo saareen maamulkaasi waraago ganacsiga lagula dagaalamayo, mudanayaa arrintaasi ma fududa, waana arrin dadka doonaya in aan dib ula midawno ee ku andocoonaya kuwa xilka u haya taagtooda iyo tamartooduba intaa tahay, waana in aynu soo dhawaynaa habdhaqanka ka fog wax ay afka ka shubayaan ee ina tusaya kala go'a iyo kala taga daruuri yahay.

Mudanayaal, marka warka xamar lala akhriyo Duruufaha ku xeeran sida dharka km ee aanu maamul ahaan ka tirsanayn, sida ciidamada shisheeye ee gaadhka ka haya, Budget yabooda ugu yimaada, bilxiiqan Somalia maaha dawlad buuxda oo shaqaysa oo go'aamo fulineed gaadhi karta, waana nimaad aan hano qaad ahayn oo wali gacanta ugu jira beesha caalamka, ku meel gaadhnimada waxaa looga saaray in la siiyo dhiiri galin iyo rajo ay buburka kaga soo kabtaan, taas badelkeed iyaga oo ku fashilmay imkaaniyaadkii dawladnimo ee lagu taageeray waxay ku darsadeen masuuliyad daro iyaga oo isku dayay in ay sharciga caalamiga ah u isticmaalaan awood iyo faro galin ka dhan ah Somaliland, taasi waxay baalmarsantahay dhamaan u jeedooyinkii iyo dadaaladii ay beesha caalamku ay ku taageeraysay, sidoo kale waxay baal marsantahay mabaadiida iyo wada noolaashaha caalamiga ah.

Somaliland waxaa la gudboon **in beesha caalamka u bandhigto masuuliyad darada ka socota Somalia, waana in lagula xisaabtamaa beesha caalamka sharciga caalamiga ah ee ay gacanta u galisay maafiyo aan meel cidna aan ku Matalin oo 2km ay iyagu ku ilaaliyaan in talaabooyinka ay qaadayaa ka dhan yahay wada noolaashiyaha, dhaqanka iyo waxkasta oo isku soo dhawaynaya.**

Mudanayaal anniga oo soo koobaya doodayda waxaan soo jeedinayaa

- in la sameeyo joint committee ka kooban dhamaan waaxyaha dawlada oo arrintan naaqisha.
- in guddi heer qaran ah Madaxweynuhu u saaro taas oo kooban Arrimaha Dibada, difaaca iyo Amniga, khubarada sirdoonka, khubarada sharciga, diplomaasiyiin, aqoon yahayka jaamacadaha iyo bulshada rajidka ah.
- In lagu kaabo shirgudoonka labada Gole iyo Axsaabta Mucaaridka ah iyo Ururda siyaasada oo madaxweynaha Qaranku talo wadaag la sameeyo.
- In maalmaha noocan ah uu galuhu uu la wadaago shacabka, sidoo kale sidii uu xildhibaan xuseen soo jeediyayna waa in galaha guurtidana lala wadaago si loo ga soo saaro qoraal calami ah oo ku socda beesha caalamka ee biilisa, masruufta ee 4t-km ku ilaalisa loola wadaago.

Shacabka Somaliland waxaan ugu baaqayaa in ay quluubta ka midoobaan midna ahaadaan, wixi qaranimadooda iyo jiritaankooda wax yeelayana ay meel uga soo wada jiistaan, sidoo kale xukuumada iyo xisbiyada waxaan ugu baaqayaa oo aan leeyahay maaha maalmihii yooyootanka mana aha maalmihii la isku fiirsanayay, mana aha maalmihii faraha la isku taag-taagayay ee waa maalin jiritaan keen aiyo qaranimadeena la taabtay. Xildhibaan iyo qof kasta difaaca qaranimadu waajib ayuu ku yahay, mudanihii iga horeeyayna fikir ahaan waan ku raacsanahay.

Mudanayaal 33kaa sanno ee ay Somaliland jirtay waa markii ugu horaysay ee aynu soomalia ban cadaan ah isugu soo baxnay, sidaa awgeed waxaynu u baahanay in aynu arrintan aynu fursad u rogno, naca iyo waxyaabay ay aburayaana waa in aynu u rognaa in aynu midnimada gudaheena aynu xoojino, waad mahadsantihiin wsc.

**Md. Abiibokor Siciid Cali** *(3min, 19sec): -* Bismilaahi Raxmaani Raxiim, shirgudoonka, mudanayaasha, shaqaalaha iyo saxaafadana waan salamayaa. Mudanayaal waxaa muuqata sida ay isku soo tarayso dagaalka iyo weerarada kala duwan ee ay dawlada Soomaaliya ku hayso Dawlada Somaliland, ugu horayn waxaan canbaaraynayaa dawlada Soomaaliya ee dagaalkeedii gaadhsiisay dadweynaha, iyada oo aanay mudnay in shacabka uu dagaal gaadho, waayo hadii uu qofku lugta ku qabto u jeedadu waa ha dhaqaaqin, laakiin hadii uu cunaha ku qabto waa dhimo.

Shacabka oo ay maanta duruufo badani soo gaadheen sida dababki kala danbeeyay ee uu ka mid ahaa dabkii WAAHEEN ma mudna in la carqaldeeyo oo diyaaradihii dalka imanayay la carqaladeeyo arrintaa oo dhaqaale ahaan saamayn yeelanaysa.

Sidaa darteed, waxaan marka hore soo jeedin lahaa;

- In Goluhu dib u-eegis iyo qiimayn ku sameeyo arrimahan faraha badan ee isa soo tarayaa khatarta ay leeyihiin, lana eego fursada inoo banaan si aynu dalkeena dhaqaale ahaan iyo Amni ahaanba u horumarino
- In dawladu kor u qaado xidhiidhka iyo iskaashiga caalamiga ah, gaar ahaan dalalkii aynu markii horaba saaxiibka ahayn si aynu u gaadhsiino dagaalka ay dawalada Somalia inagula jirto ee isasoo taraya iyada oo aanay jirin wax Somaliland iyo Samalia ay wadaagaan haba yaraatee.
- In kor loo qaado xidhiidh dalalkaa iyo ururada caalamiga si loo helo fursad.
- In arrinkani aanu ku e'kaan labada Gole ee lagaadhsiiyo Xukuumada iyo axsaabta siyaasada dhamaantood si go'aan isku mid ah loo helo arrintana meel looga soo wada jeesto.
- Ugu danbayn waxaan soo jeedinayaa in dawladu kor u qaado dhinaca amniga ee Hawada iyo bariga. Aad iyo aad ayaad u salaamantiin waanan mahadsantihiin

**Md. Mubaarik Xusseen Maxamed (Xeel-dheere)** *(1min, 11sec): -* Bismilaahi Raxmaani Raxiim, waan mahadsantahay mudane gudoomiye, annigu waxaan soo jeedinayaa qodobo kooban, Soomaalida waxay ku maahmaadaa "WAALAALKAA WIIL U LAHAW WIILKAAGANA WALAAL KA LAHAW" Aniga oo dhamaan xildhibaanadii iga horeeyay, waxaan leeyahay Soomaaliya waa in aynu saaxiibo u samaysanaa cadwgeedana waa in aynu taageernaa,

**Waxaan soo jeedinayaa;** In ay Dawlada Somaliland ka noqoto dhamaan heshiisyadii ay la gashay Maamulka Xassan Sheikh Maxamuud oo uu u danbeeyay kii Jabuuti ee ku saabsanaa Arrimaha Nabadgalyada, waana in isla maanta arrinkaa laga noqdaa waad mahadsantihiin.

**Md. Faysal Yuusuf Jaamac** *(2min, 45sec): -* Bismilaahi Raxmaani Raxiim, waad mahadsantahay Mudane Gudoomiye waanan salaamayaa mudanayasha, Shaqaalaha iyo Saxaafadaba Asc. Mudane Gudoomiye sidaa xildhibaanadii iga horeeyay sheegeen waxaan ta'kiidin lahaa jamhuuriyada Somaliland waa muqadas sida ku cad qodobada 1aad iyo 2aad ee Dastuurka JSl wax gor-gortan laga gali karana maaha. Waraag meel lagu soo qor-qorayna waxba yeeli mayso Somaliland, iyada oo ay muujisteen cadaawad cad. Qorankan Somaliland waa qaran 34-jirsaday kaliya waxaa loo baahan yahay in ayn u ka digtoonaano qorshayaashooda qarsoon ee ay inoo maleegayaan.

Mudane Gudoomiye waxaan ku raacsanaha mudanayaashii iga horeeyay soo jeedimahoodii ee ahaa in la isugu yimaado fadhi wada jir ah oo lagu soo saaro qaraan Gole oo lagu joojinayo Heshiisyadii ay Somaliland iyo Somalia hore u wada galeen. Waxaa kale oo aan soo jeedinayaa baasaaboorka Somalia waxaa lagu sameeyaa Hargiesa ee waxaan soo jeedinayaa in la joojiyo samayntiisa lana xidhi meelaha lagu sameeyo wixii yaalana laga soo qaado.

Mudane Gudoomiye Somalia waxay ku soo dhiiratay Xidhiidhkeenii arrimaha dibada oo aan u daciifay, dadkeenii oo la iska horkeenay oo gobola dhami inaga tageen dalkeena, taasi oo keentay in cadaw badani inagu soo dhiirado oo aan markii hore inagu soo dhici jirin, sidaa awgeed waxaan soo jeedinayaa in la xoojiyo siyaada arrimaha dibada ee Somaliland iyo ta arrimaha gudaha labadaba.

Shacabka Somaliland waxaan leeyahay yaan la idin kala qaybin, waayo waxaynu u jihaysanay doorasho iyada oo la inooga baahan yahay in aynu gacmaha is qabsano aad iyo aad ayaad u mahadsantihiin wsc.

**Md: Cabdinaasir Yuusuf Cismaan (Qodax)** *(7min, 35sec): -* Bismilaahi Raxmaani Raxiim, shirgudoonka, xubnaha Golaha wakiillada iyo saaxafada ASC, ugu horayn waxaan shirgudoonka ku bogaadinayaa arrintan qadiyada ee la doodayaa ay tahay mid muhiim

ah oo wakhtigeedii ku soo beegantay, in aan gole ahaan iyo cid kasta oo aynu la kaashan karno oo aynu qaraan ka qaadanaa waa mid muhiim ah waanan soo jeedinayaa.

Wada hadaladii Somaliland iyo Somalia ee bilaabmay 2012-kii waxaan u arkayay in ay ahaayeen dhamaantood maaweelo sidoo kalana aanay ahay kuwo niyad wanaag iyo qalbi wanaag aan ku dhismayn, sidoo kalana aan ahayn kuwi masiir umadeed lagu gaadho iyaga oo dhamaan heshiisyadaa la galay ay ka hirgali waayeen dhinaca Somalia oo ay dhamaantood ku soo dhamaadeen Ma dhalays iyo fashil.

Wada hadaladaashi siyaabaha ay ku bilaabmeen markii hore oo aan ahayn mid umada reer Somaliland ay ka tashadeen oo ay mid ku ahaayeen oo waxay ahaayeen kuwo dad gaar ahi jeexeen una baahan in dadkaa lala xisaabtamo.

Xukuumadii hore ee UDUB aad iyo aad ayay uga shaqaysay Arrimaha dibada oo dhawr iyo toban dal ayay qadiyada Somaliland gaadhsiisay, iyada oo ay sidaa tahay ayaynu qadiyadeedni 360 anu wareejinay oo aynu dad aynaan waxba inaga dhaxay oo aynu badi hore kala tashanay ayaynu qadiyadeenii gaynay oo aynu nidhi aan wada hadalno. Taasi oo aan u arkaayay in ay ahayd taloobo qaldan, sidaa awgeed waxaan taageersanaya sidii mudanayaashii iga horeeyay ay sheegeen in dhamaan wada hadala Somalia la joojiyo.

Markii uu soo baxay MOU-ga ay dawlada Somaliland la Sexeexatay Dawlada Ethiopia waxaa soo baxa cadaawada aan gabsho lahayn oo badheedh ah ayaa inaga timid dawlada taagta daran ee Muqdisho ka talisaa, maalinta Somaliland la is yidhaa way ugu darantahay ayay ugu ayaan badantahay. Iyada oo ay intaas dheer tahay in dadkii aqoon yahayka ahaa ee Somaliland sidii muqdisho loogu galayay ama loogu dhibaataynayay.

Sida uu madaxweyne Xassan Sheekh ka jeediyay Masiijida iyo meelaha kale waxaad ka arkaysaa ama aad ka dheehanaysaa cadaawada guunka ah ee uu inoo qabo ama maskaxdooda ku jirta, lakiin dadka reer Somaliland Cidna Cadaawad iyo Cunfi uma hayaan ee waxay jecelyihiin in dawladoodu u hagaadta oo aynu noqono laba dal oo jaar ah isna kaashada kalana madax baan oo iska kaashada cadawga is wax kasta oo khatar ku am amniga labada dal. Mar hadii ay sidaa tahay waxaan soo jeedinayaa in ay ka Somaliland ahaan wadajirkeena ilaashano meelna uga soo wada jeedsano.

Waxaan soo jeedinayaa, in dhamaan qaranka Somaliland ay arrimahan u midoobaan, mudaharaado waaweyn oo aynu kaga soo hor jeednana aynu muujiyo magaalooyinka waawayna ee dalkana laga qabto.

Sidoo kale waxaan arrintan ku Xoojinlahaa waxaa la yidhi “BUUR AHAW AMA BUUR KU TIIRSANAW” Siyaasada Maanta Geeska ka socota waa mid aynu la wada socono. Buqcad ilaahay ina dhigayna waa mid muhiim ah, waana mid quwadaha Aduunku ay u baahan yihiin, sidaa awgeed cagan saar ayaynu la yeelan karnaa, ee arrimahan socdaa

ayayna ina niyad jabin ee aynu ka qaad sprit-cusub oo cid wablba oo wax innala yeelan karo oo aynu aqoonsigeena iyo iskaashiba ka helayno aynu ku dhiirano oo ayaynaan ka gabanin ee waa in lagu dhiiradaa.

Sidoo kale waxaa iyaduna u baahan in aynu ka ilaalino cid kasta oo arrimaha doorashadeena ee inagu soo foolka leh faragalin ku samaysa oo dibada inaga imanaysa, si aanay gudaheena aanay saamayn ugu yeelan, sidoo kale wixii umadeena kala irdhaynay ee tashuushka ku furaya aynu dhagaha ka furaysano oo sidii wada tashiga iyo tanaasulka ku salaysnayna aynu sii xoojino ayaan soo jeedinayaa.

Mudane Gudoomiye waxaa kale oo jirtay in xeer lagu furay wada hadalada Somalia oo golayaashu ansixiyeen isna waa in la soo celiyaa oo dhamaantii la joojiyaa oo cid kasta oo loo arko in ay gacan saar la leedahay Somalia waa in talaabo cad laga qaadaa.

Ugu danbayn waxaan ku soo ururinayaa arrintan maaha arin yar ee waa arrin wayn oo waa wixii aynu 34kaa Sanno u soo halgamaynay ee waa in dadaalkeeda halkaa laga sii wado, runtii dalkan waxaan Alle ugu baryayaa in uu badbaadiyo, Illaahay waxaan ka Baryayaaa in Alle dalkan midnimadiisa Wanaajiyo, Alle waxaan ka baryayaa in uu dalkan gaadhsiiyo himilada iyo Hiigsiga uu leeyahay quluubtoodana mideeyo, waxaanan leeyahay maalinta adag aynu gacmaha isku qabsana qof kasta oo dalkan xil u haya aad ayaad u mahadsantihiin, wsc.

**Md: Barkhad jaamac Batuun** *(1min, 21sec): -* Bismilaahi Raxmaani Raxiim, mudane Gudoomiye anniga waxaygu waa soo jeedin, mudane Gudoomiye waxaa dood la galiyaa waxa lagu kala arragti duwanyahay, ee mar hadii aynu ka hadlayno danta dalkeena iyo dadkeena waxaan soo jeedinayaa in aynu qaraar Gole ku soo saarno ayaan soo jeedin lahaa oo cod inoo qaada in qaraarkaa aynu u codayno.

**Gudoomiye Giire:-** mudanayaal idinka oo raali ah waxaynu u baahanay waxa inaga soo baxayaa in ay noqdaan wax nuxur leh, waxaanu is tiraamaynaa soo jeedinta mudanayaasha, xataa mudayaal idinka mid ah ayaa soo jeediyay in xataa labada Gole la isku keeno, markaa waxaan mudayaal in leeyay doodu ha sii socota, wixii dooda ka soo baxa ayaynu Ururinaynaa hadii ilaahay ka dhigo, arrintan taalaa waa arrin masiiri ah oo waxa lagu soo duulay waa jiritaan keenii sidaa awgeed waxaan mudanayaasha ka codsanayaa in uu nin walba rayigiisa oo kooban urursana ka dhiibto ayaan soojeedinayaa. Waxaanan ku soo dhawaynayaa;

**Md: Axmed-yaasin Maxamed Xassan** *(7min, 03sec): -* Bismilaahi Raxmaani Raxiim, Gudoomiyaha Golaha iyo mudanayaasha, iyo saxaafada dhamaantiin Asalaamu calaykum warax matulaah wabarakaato, walaalayaal arrinta laga hadlayaa waa arrin muhiim ah,

waa arrin qadiyadeena iyo jiritaankeena taabanaysa, Dadka qaar ma fahan sana, laakiin waxaa ladoonayaa si xikmad leh habfikir sareeya lagu wajaho midnimo iyo tawfiiq.

Mandaqadan aynu ku nool nahay gaar ahaan qarankeena Somaliland waxa uu noqdey meel Geogarphy kali betel garown ah, oo lagu dagaalamayo oo awoodo shisheeye ay isku hirdimayaan.

"Xubin Rag isku wajahay haday xayda ka cadaato afku waxa uu la xoog yahay magliga xawda kaa jara.

Mudanayaal taariikhda cimraa ku sugan hadii aynu taariikhada dib ugu noqono xaaladan aynu manta ku jirno, Daruuraha colaadaha e eina dul hoganaya xagay ayay ka yimaadeen, ama maxay salka ku hayaan laba ayaan ukala qaadayaa, mid taariikhda ayaan siinayaa oo dhexdeena ayaan ka bilaabayaa, midna waa siyaasada gudaheena ee xukuumada,talaabooyinka ay qaadey wixii ka dhalanaya in aynu fahano ayaa loo baahan yahay,mudanayaal 4 sano ka hor haydaynu isku qabano taariikhda si aynu xal uhelno " wasiir Qanbi waxa uu sheegay in magaalada Buuhoodle Jabahad laga samaynayo oo uu nin dhalin yari ahi wado.

Jabahadaa iyo talada uu wasiirku soo jeediyay dhag looma dhigin waxaa ka danbeeyay in haldoorkii iyo Dilkii laasacaanood ka dhacayay uusidii usii socd, mudanayaal waxa aynu xal ka dhignay in aynu saarno dadkii koonfur Galbeed halkaasi oo ay wax inagaga dhaceen.

Dadkaasi oo hantidoodii maguurtada ahayd iyo tii guurtada ahayd uqabanay 12 saacadood, dadkaasi oo haystay liisamo ganacsi, aynu saarnay siyaasad ahaan, waxaa inagu bilaabmey dagaalkii laasacaanood, qorshe ahaan wa inoolo fikiray waana Layna galiyay innaga oo aan fahansanayn qadiyadeena iyo sida aynu unoolaanayno ayaa waxa aynu isku qaadney oo aan miciin bidnay dad sheeganaya oo ay inoo yimaadeen, Dad sheeganaya "IRIR SAMAALE" oo you tubers ah oo aynu soo dhawaynay halkay aynu isla marnay, iyo qadiyadii siday dabka ugu shiday, arrintii Gobolka sool sidii ay dabka uga shiday waynu isla ogayn.

Mudanayaal arrinta laasacaanood waxay timid markii ururada lafuray ee siyaasiyiintii Gobolka sool kasoo jeeday ay lasoo baxeen laba urur, **ururkii shacab iyo ururkii Waabari** si aan midnimada iyo qaranimada Somaliland utaabaqaadin oo aanay dadku iska dhex arag oo aanay arrimaha siyaasadu u hirgalin, waxaa laynugu soo qaadey dagaal irirsamaale iyo waxyaabo caynkaas ah si dadka ehelka nahay ee isku dhiiga iyo dhaqanka nahay ee aynu wada deganahay loo fogeeyo.

Waxaa ka danbeeyay 9 Bilood ka hor in aynu uyeedhno xubno 7 qof oo dhaqan ah oo ay 4 ay yihiin Dir kiiniya ka yimi iyo Niropi iyo seddax "**Lafti, Nagaaya"** taa marka laga

yimaado siyaasad dhexdeena ah ayaa socotay, waxaa Iyana ku xigtay shirkii aynu ku qabanay 28 ilaa 29 kii" *Gudoomiye Giire muddane adoo mahad san waxaan jecelahay in aad ku soo dhawaato Nuxurka manta wixii soo baxaya ee aan Tariikhda dib loogu mil min.*

Taariikhda hadaynu isla akhriyi waynu gudoomiye waxaa laga yaabaa in aynaan isla fahmin halka aynu usocono, shirkii jabuuti ee ahaa 28 iyo 29 kii waxaa kasoo baxay go`aano masiiri ah oo aynu ku heshiinay Dawalada Somalia oo qadiyadeena toos utaabanaya oo aan annigu aaminsanaa, in ay wax tar inoo leedahay in aynu kuwaas la dabaqo, si masiirkeena iyo qaranimadeena iyo jiritaankeena aynu uga midho dhalino.

Isla seddex cisho ka diba January 2024kii waxa aynu heshiis lagalnay dawlada Ethopia heshiiskaa aynu galnay waxa uu indhaha inagu soo jeediyay caalamka, dawaladeenii iyo siyaasadeenii meelo badan waa looga guuxay, waxaana uu dhaliyay dagaal hor leh dawladihii somaaliyeed 4 tii kale ayuu inaga horkeenay, sidoo kale Dawlado iyagu Nolol ku dagaalamaya oo ay masar ka mid tahay, Turky iyaga laftoodu iyaguna ay qayb ka yihiin dagaalka laynugu soo qaadey.

Mudanayaal dagaalka laynugu soo qaadey waynu iska caabiyi karnaa hadii aynu qawaaniinta iyo sharciyada aynu kor uqaadno, hadii aynu fkir fiican oo hufan la nimaadno, hadaii aynu siyaasad cad oo shaley wixii aynu soo marnay iyo manta waxa aynu joogno iyo jiilkeenu waxay ku danbeynayaan aynu ka fikirno.

Waxaan ku soo gabo gabaynayaa mudanayaal shalay waxaa hore loo yidhi meyd maxaa udanbeeyay kaas lasii sido, Jabhad ayaa magaaladii Baligubadle dhib ka gaysatay, markaa si guud laba arrin ayaynu diyaar unahay, Doorasho iyo Difaac, sidii miisaaniyadii halkan aynu ku ansixinay ay ku saabsanayd, laakiin waxaa ka horeeya in ay Somaliland ay gacmaha is qabsato, gaar ahaan Beesha Dhexe in ay gacmaha is qabsato, si guudna Somaliland gacmaha aynu isqabsano.

**Md: Maxamed Cismaan Maxamed** *(4min, 44sec): -* Bismilaahi Raxmaani Raxiim, shirgudoonka iyo Mudanayaasha Sharafta leh waxaan leeyahay asc, marka hore waxaan jecelahay in aan golaha in shacabka Somaliland la wadaago in dagaalkan fulaynimada iyo Cabsida iyo nacasnimadu ka muuqato ee dawladaa Somalia ku soo qaaday Somaliland ay tahay ujeedadu in Somaliland ay talaabo wanaagsan hore u qaaday helida dhinaca Ictiaafka ay caalamka ka raadinaysay mudo 33sano ah.

Dagaalkan fulaynimada ah waxa uu mideeyay oo dareen wadanimo leh kaga jawaabay umada Reer Somaliland waana arrin aan ku hambalyaynayo shacabka Somaliland, iyada oo dagaalka ay Somalia ay soo qaaday waxa uu sidoo kale si taban u saamaynayaa shacabka Somaliland ee Safraya iyo sectors ka mid ah Ganacsiga Somaliland. Sidaa darteed

falcelinta Golahan iyo Qaranku samaynaa waa in ay noqotaa falcelin laga baaraan dagay oo aan ku salaysnay Caadifad iyo inagu dhaqaaji.

Mudane Gudoomiye Anniga oo arrimahaa ka duulaya aan **soo jeedinayaa in go'aanada aynu qaadaynaynaa ay saddex qadob ay taabtaan.**

- Go'aan kasta oo Golahan iyo Qaranku qaataa waa in aanu shacabka iyo ganacsatada Reer Somaliland aanu noqon mid si taban u saameeya. Inaga oo is leh iska celiya ama ka falciliya duulaankaa Somalia soo qaaday
- Waa in dagaalkaa ay Somalia soo qaaday uu yeeshaa cost, kuna yeeshaa hay'addaha iyo ganacsatada go'aankaa Somaliland loogu soo dulaay qaatay ama taageeray.
- Go'aan kasta oo aynu qaadanaynaa waa in uu noqdaa mid si cad u tilmaamaya Meesha adage e aynu qaranimada ka taaganay.

Sidaa awgeed mudana gudoomiye waxaan hadalka ku soo khatimayaa si go'aanka ayni soo saari doonaa saddexdaa qodob u waafaqo **waxaan soo jeedinayaa in arrintan ay ka hadlayno loo Saaro Guddi ka soo baaraan degta falcelin dhab looga soo saaro oo aynu ugu jawaabayno wadankaa dagaalka inga soo qaaday si dhab ahna u taabata.** Waad mahadsantahay.

**Md: Maxamuud Saalax Cabdi** *(3min, 53sec): -* Bismilaahi Raxmaani Raxiim, waxaan doonayaa in aan tilmaamo oo aan ku raaco maxamed cisman Ra`yigiisii, oo aan taageero qodobo ka mid ah hadalkiisa, waxaan doonayaa in aan tilmaamo go`aanka ku saabsan soo jeedinta Guddida arrimaha dibada qodobo ka mid ahi waxay qodobo ay labada Golle ay wada ansixiyeen, sidaa awgeed waxay ubaahanayaan in fadhi danbe oo ay labada Golle wada yeeshaan gaar ahaan Qodobka ku saabsan, in la joojiyo wadahadaladi Somalia iyo Somaliland.

Sidaa awgeed waxaan xoojinayaa Ra`yiga ah in labada Golle ay Go`aan kasoo wada saaraan oo ay qaraar wadajir ah oo miisaankiisa leh ay soo wada saaraan, inta ka horaysa waxaan xoojinayaa in ay samayno Guddi gaar oo arrimaha masiiriga ah ee lasoo saarayo ka baaraan degta, in ayna noqon arimo dhib wayn oo aanay kasoo kaban ugaysta dadka reer Somaliland, socdaalkooda, Baasaboorkooda, caafimaadkooda iyo arrimaha kale ee lama huraanka ah.

Markaa arrimhaa waa in si miisaaman oo wixii aynu ka firsan waynana si aynu kafirsan waynu uyeelno wixii aynu isku difaaci karnana aynu isku difaacno, in aynu sidaa yeelno oo Guddidaasi si Togan uga soo baaraan degto oo aan hadeerba loo codayn.

Arrinka labaad ee aan ku xoojinayaa waxa weeye waa in aynu arrimaha Gudaha ilaalino gaar ahaan siyaasiyiinta **motive-ka** unoqdey in laynugu soo dhiirado ee maalin walba

Bulshada Somaliland ka waramaya in ay yihiin qaar federal  ah, qaarkood in ay yihiin Dad xagaa ushaqaynaya, oo qabo in ay tahay mautiveka ugu way nee laynugu soo dhiiraday iyo hogaamiyaasha siyaasada xaga hore kaga jira ay usheegaan dadka koofureed ay usheegaan halkan in ay joogaan dad badan oo xisbiyo leh oo Beel oleh oo iyaga taageeraa waxay noqonaysaa in ay inagu soo dhiiradaan.

Qadiyadaasi waa in ay aad uga muuqato, Talooyin Keenan waa in laga maarmaa oo aanay dib udhicin, Nin Gudoomiye xisbi ah, Nin siyaasi lagaranayo ah, Nin wasiir dawladeed ah, Ninkale oo madaxda siyaasada Somaliland ka mid ahi in isaga oo doonaya in uu ka dhigto meel uu siyaasada uu isagu uu kaga macaasho inuu qaranka Somaliland uu qaybiyo uu dabeed uu noqdo signal uu siinayo cadwga oo ah in ay ku soo dhiiradaan Somaliland qadiyada aad iyo aad baan u adkaynayaa.

**Md. Maxamuud Faarax Jaamac** *(2min, 52sec):* - Bismilaahi Raxmaani Raxiim waan salaamayaa dhamaan Gollaha iyo shirgudoonkaba iyo saxaafadaba waxaan horta taageersanahay oo mar walba aan ogolahay qoraalkan kasoo baxay Gudoomiyaha Guddida arrimaha dibada sida uu usoo qoray dhamaan waan taageersanahy, hadaladii xildhibaano badan kasoo baxay dhamaan waan ku raacsanahay.

Difaaca qaranka iyo wada jirkiisuba waa muhiim waanan ku adeg ahay in aan marwalba aan difaaco qaranka.

Difaaca qaranku wuu noocyo badan yahay, noocyada aynu halkan ku haynaa waxa weeye baaqyo iyo jawaabo laysu marinayo saxaafada taas iyo hawsheeda waxaan ku talin lahaa in laxoojiyo Guddi wadjir ah loo saaro, lanaaqisho si sahlan oo caadifadaysan loo dhex galin ee bal wixii khasaare iyo faaiido ka iman kara labadaba lakala guro, Guddi loo saaro ka dib wada tashiga ay inoo soo gudbiyaan aynu ka go`aan qaadano.

Dhaliisha halkan maraysa ama dhiiranaanta Somalia ay soo dhiiratay waa mid ka timid maamulka iyo dawlada Somaliland, dawlada somaaliland waxay ka mashquushay arrimihii dibada waxay ku mashquushay arrimihii Gudaha khaasatan Asxaabteedii iyo Beelihii kuwo inaga mid ah dagaal baa lagu qaadey iyaga oo mudaharaaday oo wax ka cawdey ayaa jawaab looga dhigay dagaal, dagaalkiina waxa uu sababay in Go`do halkaana ay Somalia ay kasoo dhiirato.

Kuwa kale oo doorasho diyaar u ahna Iyana buuq ayaa lagu furay Iyana waxaa laleeyahay hadal iyo buuq ayaa lagaliyay, kuwaasina dhibteeda ayay leedahay midnimadeena iyo wadajirkeenuna iyo difaaceenuna waxa u uku salaysan yahay midnimadeena.

Waxaan soo jeedinayaa dalku waxa uu u dhaqaaqay doorsho, wax kasta oo doorashada lagu carqaladaynayo diyaar uma nihin, doorshada ka dib wax walbaa wey inoo suurta galayaan, midnimo, difaac qaran baa inoo suurta galaya inta ka horaysa waxa aynu iskaga

celinaynaa cid kasta oo inagu soo duushaba hab wada jir ah, laakiin mudnaanta waxa aynu siinaynaa manta oo dadkeenu diyaar uyihiin waa doorasho.

Qaraarka inaga soo baxaya waa in ay ku cadaataa in mudnaanta koobaad ay doorashada ay tahay loona diyaar garoobo.

**Md: Xirsi Cabdilaahi Xirsi** *(4min, 46sec): -* Bismilaaahi Raxmaani Raxiim mahad sanid Gudoomiye runtii waan hambal yaynayaa shirgudoonka iyo Golaha wakiilada doodan aynu manta ufadhino, dagaalka qaawan ee Somaliland lagu soo qaadey maaha mid ku bilaabmey labadii go`aa nee udanbeeyay ee kasoo baxay Dawlada xasan sheikh weegii udanbeeyay.

Ee laakiin dagaalkaasi waa ka laga dareemayo Gobolada Bariga, waa dagaalka laga dareemayo Qoro lugud, Oog, Ceerigaabo runtii runtii gobolada bariga ee Somaliland shacbiga gobta ah eek u nool qofkii lasheekaysta ee lasoo jooga ayaa waxa uu dareemayaa xaalada ay Somaliland ay manta ku sugan tahay.

Ma aha xaalad siyaasadeed ma aha xaalad aynu inaga dhex deenu is weydiino halkee wax marayaan waraaqo masoo saarnaa, ma ujawaabnaa somalila oo ma nidhaahnaa Diyaaradaha iyo Ganacsiga noo nabad galiya ee waa xaalad dagaal oo dhamaystiran.

Runtii shacbiga gobta eek u nool gobolada bariga Somaliland waxay ka tagaeen Ganacsigoodii, iskuuladoodii, waxay uqaateen qoriga oo ay jeeniga usaarteen in ay dalkooda difaacdaan.

Fariinta aan intii aanu dhex joognay kala soo kulanay waxay ahayd "waar bal caasimadii iyo galbeedkii gaadhsiiya waa laydin sugayaaye.

Runtii dagaalkaasi kuma koobnaanayo Bariga oo kaliya ee hadana Taataabasho badan baa ka jira Galbeedka Somaliland, cadawga Somaliland kuma koobna Somalia oo marka horeba cadaw inoo ahayd, Jabuutina waxba umay yareesan oo Iyana dhaq dhaqaaqedi wey bilowdey.

Golaha wakiilada waxaan usoo jeedinayaa in go`aanka inaga soo baxayaa uu noqdo go`aan difaac, kaasi oo noqonaya mid diplumaasiyadaeed iyo mid ciidanba, waa in aynu ku dhiirigalinayaa shacabka Somaliland in ay garab istaagaan ciidamada qaranka,sidoo kale ay garab istaagaan ciidanka madaniga ah ee " SSP" waana in qofkasta oo reer Somaliland ahi tay ku dhaqaaqeen shacabka gobolada bariga somaliand waa in ay ku dhaqaaqaan dhamaana ciidanka madaniga ah meel walba laga sameeyo loona diyaar garoobo difaaca qaranka.

Culayska manta inaga soo cusboonaaday Somalia muu bilaabmin manta ee waxa uu dheriga uu kulaylku soo dhaafay 1 janury markii uu madaxwaynaha JSL uu lasoo saxiixday Ethopia heshiiiskii is fahankii ku meel gaadhka ahaa kaasi oo ahaa bilowga ictiraafka Somaliland ama bilowgii kala gurashada iyo kala dhaamadka Somalia.

Runtii waan ku hambalyaynayaa xildhibaanada sheegay in aynu gabi ahaanba faraha ka qaadno wadahadaladii inta badan dhicisoobey ee Somalia lala wadey wax kasta oo lala soo galayna ay noqdeen waxaan shaqayn.

Waxaan xildhibaanada usoo jeedinayaa masuuliyiinata qaranka, madaxda Xisbiyada iyo xildhibaanada halkan fadhiyaaba waa in ay ilaaliyaan dareenka shacabka, maaha qofku siyaasad iyo urur hebel uhiili iyo xisbi mucaarad ah uhiili in uu wax ku yeelo dareenka shacabka ah ee gobta ah ee manta banaanada jooga eek u dib jiray ee noloshooda oo dhan uga dhaqaaqay in ay qarankooda difaacaan.

Waxaynu ubaahanahay in aynu baaq udirno dhamaan shacabka Somaliland mid xil hay aiyo mid aan hay nee Somalia jooga waa in ay dalka Somalia kaga soo baxaan waqtiga ugu kooban ee ay kasoo bixi karaan.

Xukuumada waxaan usoo jeedinayaa in cafis mudo kooban ah lagu dhawaaqo kaas oo aan laba todobaad ka badnaanayn, qof kasta oo Somalia xil ka haya oo somalialand udhashayna uu shandadiisa kasoo laalaabto, Meesha waxba iskuma keen hadhi, waqtigaasi wuu dhamaaday madadaaladii ahayd waan ku qaniinayaa waan ku afuufayaa waxba kama jiraane kasoo hoyda.

Odayba waxa uu soo dul istaagay" Reer socdaalay oo guuray, Nin aad usoo oomey buu ahaayoo reerkii gaadh dabadeed waxa uu arkay labo wado oo midna Bari uga baxdey reerkii midna Galbeed marka uu mudo raadiyay oo raadna arki waayay, labdii wado mid ayu uku go`aansadey in uu iska raaco marka uu habeen iyo maalin socdey ayuu reerkii oo degay uu gaadhay markii uu gaadhay ayuu aad u ooyay oadaygii weynaa waa laga yaabey sida uu u ooyay waar maxaa kaa oohisiiyay wuxuu yidhi waxaan ka naxay wadadii kale ayaan qaadi gaadhoo halkay igu weyday ayaan ogaa" Reer Somaliland marka doorashada gaadho cida difaacaysa waynu garanaynaa

**Md: Mustafe Axmed Cabdilaahi (khayreeye)** *(10min, 43sec): -* Bismilaahi Raxmaani Raxiim shirgudoonka mudanayaasha Gollaha wakiilada xubnaha Gollaha ee miniteska qaadaya ee shaqaalaha ah aad iyo aad baan usalaamayaa, mudanayaal arrimaha manta aynu ka hadlaynaa waa arrimo manta shacbigu inaga eegayay, waa arrimo bilihii udanbeeyay soo noq- noqonayay waana arrin aan aamin sanahay in aanay ku dhamaan karayn maalin laakiin waa arrin taabanaya masiirka iyo jiritaanka umada Jamhuuriyada Somaliland ku

dhaqan markaa waa arrin u baahan deganaansho, waa arrin ubaahan ka baaran deg waana arrin ubaahan go`aan umadda uqalma in aynu golayaasheena uu ka soo baxo.

Marka koobaad waxaan ayidayaa isla markaana aan taageerayaa soo jeedinta Guddida **arrimaha dibada uu gudoomiyahoodu halkan kasoo jeediyay sidoo kale waxaan taageerayaa soo jeedinta maxamed cisman** ee ahayd in arrinkan Guddi loo saaro si arrimaha wixii technical ah si go`aankeenaasi aanu unoqon mid caadifad ku dhisan ee uu noqdo, go`aan umada masiirkeeda lagu sugi karayo, sidoo kale xildhibaan maxamuud saaalax oo iga horeeyay asna aragtida ku dhisan isku jawaabka inaga dhexdeena ah ee umadda cadwga layskugu samaynayo taana waan taageerayaa.

Maamulka muqdisho joogaa waxa uu bilaabey dhul jiifnimo siyaasaded oo ku dhisan cadaawad guun ah oo lagu beegsanayo Nolosha, Ganacsigag iyo jiritaankeena qaranimo maamulkaasi waxa uu 6 dii bilood ee udanbeeyay waxay badhtilmaameed ka dhigteen shacbiga kasoo jeeda JSL ee hawlaha shaqo ee gaarka hadii ay ushaqaynayaan companyniyda, Hay`adaha caalamiga ah iyo kuwa maxaliga ah ee muqdisho, kuwaas oo qaarkood lalaayay qaarkoodna laxidhay oo xoriyadoodii laga qaadey qaarna xoolahoodii lala wareegay, waxaynu dareensanahay Eng cabdinaasir alle haw naxariistee sidii axmaqnimada ahayd ee ay udileen ilaa hadana wax ka hadlay ayna jirin arrimahaasi waxay ahaayeen cadaawad qoto dheer oo umaddan loo gaystey, arrimahaasi waxay ubaahan yihiin in loo sameeyo diwaan taariikheed iyo kayd, dadkii ay wax yeeladu kasoo gaadhayna xukuumadu in ay taageero siiso.

Mudanayaal waxaan soo jeedin lahaa dhawr qodob waxaan ku bilaabayaa in lalaalo wadahadaladii aynu lagali jirnay dawladaa muqdisho joogta, kuwaas oo madhalays ahaa maadama oo wax garawshiyo ah laga waayay xukuumada halkaa ka dhisan.

- Waxaan kale oo aan soo jeedinayaa in talaabo laga qaado cid kasta oo ruqsad shaqo ka haysata ama wada shaqayn in uun laleh JSL iyo hay`adeheeda kala duwan oo awaamiirta ka qaadata maamulkaa.
- Waxaan soo jeedinayaa in cafis loo fidiyo dadka hawlaha muqdisho ku dhex jira ee cadaawada culusna ku timi ee markii dalkoodii ay iman lahaayeen, ka baqaya in la xidho oo faldanbiyeedkaa ay galeen lagu qaado, in dadkaa modo kooban lacafiyo waxaan ku taageerayaa xildhibaan xirsi oo iga horeeyay.

Waxaan kale oo aan soo jeedinaya hadalada ka baxsan milgaha qaranimada Somaliland ee xubno ka tirsan xukuumada ay hawada umariyaan xisbiyada mucaaradka ah ururda siyaasada, xubnaha ka mid ka ah Golayaasha Qaranka ah hadaladaasi oo aanu u aragno kuwo ka baxsan milgaha qaranimada, Anshaxa dawalada, anshaxa masuuliyada ka baxsan, waxaynu ognahay in manta madaxwayne muuse biixi cabdi uu joogo in uu doorasho galayo, ragga kale ee musharaxiinta ee sharaxan Eng Faysal cali waraabe iyo cabdirahmaan

maxamedd cabdilaahi oo iyagana laga yaabo waqtiyada soo socda in ay madaxwaynayaal noqdaan, in si aan milagaha dawladnimo loocaayo oo loo aflagaadeeyo, oo xubno masuuliyiin ah oo Gollaha iyo qaranku uu dhaariyay in ay hadal oaf suuqi ah in meelaha ka yidhaahdaan, waxaan aamin sanahay in aanay raga waxba yeelayn ee ay dhaawacayso umadeena cadwgaana ay yididiilo unoqonayso iyo farxad ayaan aamin sanahay.

Mudanayaal arrimahaasi waxay ubaahan yihiin taxadirkeeda qofku hadii uu mucaarad ka hadlayo ma muxaafad in arrimha dhaliisha ah, in aynaan ka bixin xadka oo aan laysku xadan tayn qaranimada si aynu hal cadaw uyeelano oo aynaan hoosteena isu eegin.

Shacabka JSL waxaan usoo jeedinayaa in ay dhawraan wada jirkooda isla markaana ay difaacaan qaranimadooda, qof kastaaba masuuliyada inta saaran ee uu leeyahay, kii social media yaha ka hadli kara, qof kastaa xirfada uu leeyahay ee uu dalka ku difaaci karo ayaan usoo jeedinayaa in uu xil wayn iska saaro.

Deegaanka bariga in colaadi ka jirto waa dareen jira oo xaqiiqo ah horena we yuga dhacdey iminkana sida mudanayaasha qaar sida ay sheegeen waa kuwa galbeedna dareen ka qaba.

Mudanayaal idinka oo sharfan sidii xildhibaan xirsi duruufaha u uku soo arkay bariga, ciidanka madaniga ah ee difaacaya dalka, horta waxay hayaan masuuliyadii aynu dawladan aynu udooranay ee ay ahayd in ay dalka difaacdo, oo aynu u aragno in masuuliyadii difaaca ay badh qaateen, si aanu arrimahaa usugno mudanayaashu waxay ku amaanan yihiin in miisaaniyadii Qaranka ee innaga baxdey kal hore in aynu isku daynay uu golahani ansixiyay, si ciidamadaasi qayb uga noqdaan cadwyadaa aynu arkayno, ciidamada qaranka si ay garab ugu noqdaan.

Waanu ka xun nahay in xukuumadu ay arrinkaa ay dhayal satay oo ay meeqaamkii ay ciidamadaasi lahaayeen ay marin weyday aad iyo ad baan uga xumahay, waxay ahaayeen wax difaaca qaranka ku soo biiraya ayay ahaayeen.

Waxaan arajaynayaa insha'allah doorashadii ayaa inoo dhacaysa kuwaasina xuquuqdoodii wey heli doonaan qaranka ay difaacayaan baa u og insha allah waana la ansixin doonaa xaquuqdoodii, hadii xukuumada manta jirtaa ay fulin weyday.

Waxaan soo jeedinayaa xisbiyada mucaaradka ah iyo ururada aanu masuuliyiintooda aanu ka mid ka nahay in Qaranimada Jsl ayna ahayn wax xukuumada ku gaar ah, wax madaxwaynha ama xisbi gaar u ah laakiin ay masuuliyad inaga saaran tahay qaranimada.

Kursiga ayaa laysku hayaa qaranimada layskuma hayo shacabka JSL ee nakala taageersan waa in lawalaaleeyaa quluubtooda lasoo jeediyaa oo la tusaa in waxa laysku eryanayaa ay tahay kursiga ee aan lagu kala aragti duwaynayn jiritaanka qaranimda.

Waxaan soo jeedinyaa oo doodayda aan ku biirinayaa in ay labada Golle ay isu yimaadaan, in Guddi loo saaro ay waliba hormuud ay ka yihiin Guddida arrimaha dibadu meelo badan bey gali doonaan wax dhayalsi ahna maaha, Golaha kaliya ee mudaxileedkisa ku jira ayaynu nahay, aynu ka shaqayno walaalaynta umada, in waxyaabaha deel qaafka ah ee umada kaladilaya in aynu ka dhawrno ayaan soo jeedinayaa.

**Md. Cabdikariin Maxamed Muxumed** *(6min, 32sec): -* Bismilaahi Raxmaani Raxiim alxamdulilaahi rabil caalamiin ilaahyaba mahad leh. Shirguddonka Golaha wakiilada JSL, xildhibaanadda golaha wakiilada, shaqaalaha golaha iyo saxaafdada asalaamucalaykum waraxmatulaahi wa barakaatu.

Mudane iyo mudanayaal iyada oo tariikhdu maanta ay tahay 26/8/2024 sidii shirgudoonka iyo guddomiyaha goluhu uu halkan ka sheegay mawduuca aanka hadlayno agendaheena ee ah runtii faragelinta qaawan, dagaalka iyo hagardaamada dawladda Somalia kusoo qaaday jamhuuriyada Somaliland iyo shacabkeeda runtii mawduucaasi oo ah mawduuc maanta taagan una baahanin in aynu go'aan ka qaadano, wax iska weydiino, talo iska weydiino. Maadaama oo aynu nahay wakiiladii shacabka, mudanyaashii iyo xildhibaanaddii ay shalay doorteen golayaashii matalayay shacabka reer Somaliland Xaaladda soo koradhay in aan wax iska weydiino oon go'aan gole ka qaadano oo golayaasha qaranku wax iska weydiiyaan runtii waa qodob aad loogu baahan yahay.

Ugu horayn waan ku raacsanahay xildhibaanaddii iga horeeyay iyo guddomiyihii arrimaha dibedda ee golaha iyo guddida iyo xildhibaandii ka hadlayba fara-gelintaa qaawaniyo dagaalkaa dhaqaalaha, ganacsiga iyo shacabka taabanaya ee dawladda Somalia muddoyionkii u danbeeyay ayku hawlnayd imikana ay runtii waraaqo ay qortay ay leedahay magaca Somaliland websiteska, mareegaha iyo hay'adaha kale ay kula xidhiidhayso oy kula dagaalamayso waraaq meel lagu qoraa shacabka Somaliland iyo qadiyadiisa iyo JSL midna wax ma yeeli karo.

Ugu horayn waxa aan qadarinyaa qodobka nuxurka ah ee ugu muhiimsan in aan taageero oo ah in aynu runtii dal ahaan iyo qaran ahaaniyo ka Somaliland ahaan ba golayaasheena qaranka golaheena wakiilada iyo golaha guurtidu go'aan gole oo loo midaysan yahay wada hadaladii Somaliland iyo Somalia ka dhaxeeyay halkaa lagu joojiyo maadaama oon wakhti siinay oo 2012 kii ay soo bilaabmatay oo runtii wada hadaladaasi ay noqdeen kuwa madhalays ah oo 12 sanno aan wakhti siinay ujeedadda aynu ugu jirnayna ay ahyd in aynu qadiyadeena JSL aynu ka dhaadhicino oo ay aqbalaan balse waxa muuqata in ay ka dhaga adaygeen wada haddaladasina ay noqdeen kuwo lagu hungoobay nuxurkii iyo ujeedadii laga lahaana aynaan ka gaadhin isla markaana dawladdda somalia ayku fashilantay shaqadii ay u haysay dadkeeda ayna bilowday cidiyo ku dagaal iyo in ay shirkadaha ganacsiga iyo dhaqaalaha ay farageliso.

Haddii ay isleeyihiin dadka reer Somaliland iyo shirkadaha reer somaaliland ay leeyihiin halkaas ayay jogaan halkana kuwa Somalia kasoo jeeda ayaa ganacsiyo badan u leh oo uu taabanayaa. Mar haday sidaa tahay waxa aan soo jeedin lahaa in fadhi wada jir ah labadda gole ay ku yeeshaan oo aan ku jojinayno wada hadalkaasi go'aan keenana uu qayb ka noqdo si uu unoqdo wada hadalka qabyaddii go'aankaa markii la furyay 2012 kii iyo go'aan gole oo labada gole ay u dhamaayeen lagu furay imikana in aynu ku xidhno wada hadaladaasi oo ujeedadii aan ka lahayn aan laga gaadhin dhankoodana ay ka gaabiyeeen aynu halkaasi ku joojino.

Arrinta labaad Somaliland in strategic ay ka yeelato sal balaadhan qarinamadeeda ay kaga iibinayso wadamada Africa iyo aduunka inteeda kalaba oo ay u horayso go'aanka heshiiska is fahan ee Ethiopia iyo Somaliland wada galeen in qadiyadda Somaliland iyo ictiraafkeeda laga midha dhaliyo waxyaabaha aan ubaahan nahay ee runtii u quus goynaya dawladda Somalia iyo shacbkeeda oo guul daraynaya in Somaliland mar uun ay kusoo noqoto balse shacbkani qadiyadeedaasi ayna ahy mid gorgortan laga galayo. Arrinta kale een aan doonayo in aan soojeediyo waxa weeyi maanta arrintan taagan iyo arrimaha qaranimada Somaliland iyo qadiyadda taabanaya mucaarid iyo muxaafidba in aan u midowno oo arrimaha dhexdeena ah marka ay arrimaha noqoto aynaan isku xoqin aan cidna cid ku eedayn.

waxa aan is leeyahy wxa weyaan waxyaabaha ubaahan in la saxo dadka sida hoose u fikirayana loo baahan yahay in loo aqli celiyo marka ay noqoto qaranimada iyo qadiyada Somaliland shacabkeeda ee 33ka sano ee halganka iyo naftuba ayku baxeen markaa waxa ay ubaahan tahay arrintaasi si mudakarnimo ka muuqato masuuliyiinta saaxada siyaasada ku jira muxaafid iyo mucaaridba loo ilaaliyo.

Arrinta kale u baahan ee aan doonayay in xildhibaanada golaha wakiilada laftoodu oon saaxiibaday doonayo in aan u tilmaamo had iyo jeer maadaama aan ka tirsanahay gole qaran hadalkeena iyo ficilkeena in ay ka muuqato oo maanta oo kaliya aynan kawada hadal oo had iyo jeer hadalkeena iyo socodkeena iyo doodeenu ay noqoto dood heer qaran ah oo aanay noqon maalinta ay cidi kaaga timaado hadal xanaf lihi aadan xasuusan un ood odhan haloo dhaqmo si qaranimo ah balse ay ubaahan tahay arrintaasi dood markasta taagan oo qofka masuuliyadan hayaa ee xildhibaan golaha wakiilada ah ee xasaanadda leh ee masuulyad heer qaran ah hayaa isaga laftiisu in uu ku xisaabtamo markasta masuuliyadaasi in ay tahay masuuliyad uu qaranka oo dhan uu u hayo Somaliland oo dhan uu wakiil kaga yahay.

Qofkuna dooda degaankiisa ka taagan wuu u hadli karaa balse ereyada xanafta lihi in ayna noqon wax caado inaga ah oo sharafta iyo karaamada golaheena aynu ilaalino waxaan la qabaa qodobada kale ee guddidu soo jeedisay laakiin, nuxurka ugu muuhimsan

een doonayay in aan ta'kiidiyo waa qodobkaasi wada hadalkaasi somalia in la joojiyo qaraar labada gole ahna lagu joojiyo wsc.

**Md: Maxmed Jaamac Ismaaciil (koodbuur)** ***(4min, 43sec): -*** Bismilaahi Raxmaani Raxiim mudane gudoomiye iyo mudanayaal arrintani waa arrin xaasaasiya loomana baahna marnaba si caadifadaysan ama si deg deg ah uga jawaabno waayo dagaal dhaqaale ayaad moodaa in uu inagaga yimi dawlada Somalia, dagaal dhaqaalana waa dagaal dagaalada ka mid ah 1973 ayaa shidaalka uu ka joojiyay, sucuudigu wadamada reer galbeedka, waxay kaliftay in uu maraykanku uu diyaar gareeyo ciidankiisa si u uqabsado maadaama ay taabanaysay wadankiisa dhaqaale ahaan, markaa halkaas ayay qadiyadu taagan tahay ama ay gaadhsiisan tahay.

markaa waxaan ubaahan nahay in aynu kaga jawaabno si degan oo aan caadifad aanay ku jirin, madaxwaynaha Somalia waxa uu sameeyay Guddi uu ugu talagalay in ay ladagaalanto heshiiskii ama MOU gii aynu lagalnay Ethopia, Guddidaasi caalamka xidhiidho bdan ayay la samaysay, waxayna intaa ka dagaalamaysay si aanu heshiiskaasi aanu ufulin.

Waxaa Iyana uu dagaalkaasi ku salaysnaa maadaama uu Iyana ictiraaf uu soo muuqdey, uuna kasoo muuqdey wadahadaladii iyo heshiiskii Ethopia iyo dhex maray Somaliland, Guddidaasi waxay qorshaysay oo ay la xidhiidhday caalamka intiisa badan, iyada oo isticmaalaysa xidhiidho toos ah iyo social media Iyana adeegsanaysa, wadamada ay la xidhiidhay waxaa ka mid ah, "EU, maraykanka, UK, taas oo ay ka codsadeen safaaradahoda in somaliland laga joojiyo wixii dhaqaale ah lasiiyo, taasna loo leexiyo Somalia si ay midnimada u isticmaalan sida ay iyagu idhiheen, Guddigaasi waxay xitaa awood ay ku yeelatay xitaa wasiirda Somalia ka dhaadhicisay ama ku khasabtay in ay waraaqo uqoraan diyaaradaha Falay Dubi iyo Ehopia Airland.

Guddigaasi waa guddi xoogleh aad ushaqaynaysa oo doodeeduna ay tahay Somaliland hadii ay ictiraaf hesho ama Etopia ama cid kale ay siiso in ay xasilooni ku keeni karto Geeska afrika, mana fahmi karo xasilooni darada ka imanaysa Somaliland maadadma oo inata badan xasilooni daro ay ka jirto kana imanayso dhinaca Somalia.

Hadaba aniga oo ku raacaya kuna ayidsan soo jeedintii, Guddida arimaha dibada iyo mudanayaashii iga horeeyay gaar ahaan xildhibaan maxamed cisman waxaan taageersanahay**, in Guddi Gollahan aynu ka samayno arrinkan kasoo tala bixiya kanaa soo baaraan dega, waxaan kale oo aan soo jeedinayaa in Iyana Guddi gaar ah in ay xukuumadu Iyana ka samayso, hanoqoqo Guddigaasi Guddi isku dhaf ah Baarlamanka iyo fulinta,** hadii ay Guddi gaar ah samaynayso dhib uma arko laakiin waxaa loo baahan

yahay kaa qolada Somalia kuwa kasoo horjeeda in aynu samayno, Guddigaasi ay noqoto kuwa ka baaraan dega weerarkaa inagaga yimi Somalia.

Waxaa Iyana muhiim ah in aynu xidhiidh joogtayn ah ama dar dar galin ah layeelano caalamka gaar ahaan wadamadii aynu saaxiibka ahayn oo laga shaqeeyo Buranbagaandaha ama dacaayada ay fidinayaan  Somalia in aynu ka hortagno oo aynu gaadhsiino, xaqiiqda dhabta ah ee Somaliland iyo Ethopia wadahadalka iyo  heshiiska dhex maray, waxa u uku salaysan yahay iyo ujeedada Somaliland ee ictiraaf raadinta, waxaan soo jeedin lahaa in aan arinkaa la dhayalsanin, xukuumaduna ay awood dheerad ah ay iska saarto gaar ahaan wasaarada arrimaha dibada oo muuqata in ay shaqadeedu ay aad ugaabinayso.

**Md: Cumar Jaamac Faarax** (4min, 32 sec): - Bismilaahi Raxmaani Raxiim shirgudoonka mudanayaasha Gollaha dhamaantiin waan idin salaamayaa, waxaan aad utaageerayaa hadaladii ay yidhaahdeen Koodbuur, maxamed iyo rag badani oo ay ka dhawaajiyeen.

Horta go`aamada aynu qaadanaynaa in ayna noqon kuwo caadifi ah oo waqtiga yimaada ku salaysan waxa aynu ubaahan nahay in hadaladii uu soo jeediyay Gudoomiyahayagu, in arrintaas Guddi dhan loo saaro oo Garyaqaano leh oo soo eega, soona tafatira, oo si miisaaman oo aan caadifadi ku jirin, oo qaraarka Gollaha kasoo baxayaa uu noqdo qaraar yacni cuntamaya inaga iyo aduunkaba u cuntamaya uu noqdo oo aynaan ku soo saarin hadal inagaga yimi Dawlada muqdisho.

In aynu Guddi usaarno aqooyahano leh xeer yaqaano leh ayaan taa soo jeedinayaa.

Waxaan taa ku darayaa niman yahaw warbixintii uu ina siiyay Gudoomiyaha Gollaha wakiiladu, Bisha 24 keedii waxa uu inoo xaqiijiyay xidhiidhka ka dhexeeya xukuumada iyo Gollaha wakiilada in aanu wanaagsanayn, sedexdii sano oo ay Bishan inuugu buuxdana marnaba ma wanaagsanayn xidhiidhka ka dhexeeya xukuumada iyo Gollaha wakiilada iyada lafteedu taasi waxay ku keenaysaa dib udhac wadashaqayntii uu qaranku wada lahaan lahaa.

**Waxaan soo jeedin lahaa in Guddiyada aynu saarno bal ay ka hawl galaan bal sidii** xidhiidhkaa xumaaday loo hagaajin lahaa,waxyaabaha ugu culus waxaa ka mid ah xukuumada Golluhu wuu uyeedhaa mid qudha oo ina maqlaa ma jiro, ixtiraamkii baa lumey wada shaqayntii baa luntay foolxumo ayay qaranka ku tahay wadashaqayn la`aanta ka dhaxaysa xukuumada, Garsoorka, iyo Gollaha wakiilada taa lafteeda in xal loo raadiyo ayaa loo baahan yahay waxaa udanbeysay, Gollahani waa ka xaqa uleh in uu miisaaniyada qaranka uu dajiyo pas gareeyo lagu dhaqmo iyada oo sideedii ah baa gollaha lagu soo celiyay oo layidhi wax allaale wax lagaga dhaqmayaa ma jirto.

Waxaan soo jeedin lahaa bal horta inaga gudaheena aynu hagaajino xidhiidhka inaga iyo xukuumada, Garsoorka iyo Gollaha ka dhaxaysa, marka aynu isla jaanqaadno ayaynu dibadadana wax iska celin karnaa oo iska difaaci karnaa Keenan baana xun.

Guddiga arrimaha dibada ayaan ka mid ahay labadii xiliba marna waanu soo qaban weynay wasaarada arrimaha dibada xidhiidhkeda iyo Golluhu ma wanaagsana ma ogin wax wadanka kasocda halka uu marayo waana wax yaabaha ugu liita meqaamkeenii marnaba xukuumadu inama gaadhsiiso, dad la soo doortay oo dad matalaya oo warbixin ku celinaya meqaamkeedii ma joogno xukuumaduna arrinkaa ma hayso taasina waa mida ay dhibaatadu ka taagan tahay.

Waxaan aad utaageerayaa Guddidaas, in lasameeyo oo aan ku koobnaan manta arrimaha taagan in laga hadlee si xidhiidhada loo hagaajin lahaa sedexda dhadhaar ee dawaladeena ayaynu ubaahanahay, wada shaqayn ayaan ku baaqayaa in laysu soo dhaweeyo, marka laga hadlayo xidhiidhka inaga iyo Ethopia ama MOU wax allaale wax laga og yahay ma jirto cid, Gollihii dhamaa ee wadanka ee baarlamanku aanu waxba kala socon siyaasadii wadanka, dee dhibaato wayn ayay tahay inagana ceeb ayay inagu tahay arrinkaa ayaan soo jeedin lahaa.

**Md: Cali Caraale (Cali-qaran)** *(5min, 19sec): -* Bismilaahi Raxmaani Raxiim, shir-gudoonka dhamaan Mudanayasha Golaha Wakiillada, shaqaale weynaha, Saxaafada Asc. Mudanayaal run ahaantii Mawduucan Maanta halkan lagu ibo furay, "*Tukaa lagu yidhi goormaan wax dareentaa waxaanu yidhi mar laba nin is eegaan Xuur ayaa la yidhi adna waxay tidhi marka laba dhaqax igu dhacaan midina igu soo socdo*" markaa Golaha Wakiillda ee hada 3-da sanno jiray waxaan aad ugu axumahay in maanta mawduucan la soo hadal qaado. Sababta oo ah waxa hada dagaalku inagu socday 3ama 6-dii sanno ee u danbeeyay.

Sida aynu ka wada warhaynay markii dhoola tuska lagu qabanayay maadaarka Berbera in laas-caanood la soo weeraray Golaha Wakiiladu waxa u uku hadlayayna markhaati iyo Marag ayay leedahay, sidoo kale waxaynu ognahay markii MOU-ga ay Somaliland la gashay Ethiopia dagaalkii aan loo kala hadhin ee Somaliland lagu qaaday, markaa in aynu dagaalka intaa inagu socday aynu maanta haab-haaban waa wax golahani uu boog iyo canbaarayn ku leeyahay.

Hadaba arrintani waxay inooga baahan tahay in aynu siweyn isugu duubnaano, waxaad arkayseen Raysal Wasaaraha Dawlada Taagta daran ee Somalia hadalkii uu yidhi in dad badan oo reer Somaliland ah ay godka ka soo saartay, waxaan jecelahay in aynu meel ka wada jeedno Dhana uwada jeedsano.

Sidii ay Xildhibaanadii iga horeey ay sheegeen waxaan la qabaa in mawduuca ku saabsan heshiiskii ay 12-sanno ka hor la gashay Dawlada Somaliland Dawlada taagta daran ee Somalia in sidii markii hore ay labada gole u ansixiyeen ay u diidaan.

Waxaan leeyahay dawlada Somalia waraaqo aan ka tirtaan magaca Somaliland wax uu qadiyada Somaliland ay ka jaraysaa mar jirto, hadii in uun aad wax qaban kartaa quluubaha dad reer Somaliland ka tira qaranimada Somaliland, waayo waxay ku qorantahay quluubaha Dadka reer Somaliland. Qadiyada Somaliland waa iraado shacab waana wax aan ka go'ayn quluubtooda waa mid ay ku tashadeed in ay goonideed u taagnaato Somaliland, mana aha wax is hortaag iyo carqaad lagu samayn karo.

Waxaan aad iyo aad u bogaadinayaa shacabweynahay dadka Reer Somaliland ee muujiyay sida ay Somaliland uga go'antahay, xili kasta oo ay gaadhana u rajaynayaa in Somaliland ay noqoto dal jira oo madaxbanaan. Sidoo kale waxaan aad iyo aad u bogaadinayaa dawlada Somaliland oo door muhiin ah ka qaadatay Ciidamada Madaniga ah, hadii ay noqoto saanadooda iyo saadkoodaba, waxaan leeyahay waad ku mahadsantihiin intaa ayaa lagu tanaadayaa qarankuna xuduudihiisa ku gaadhayaa.

**Waxaan soo jeedinayaa; -** in cafis mudo kooban ah loo fidiyo cid kasta oo joogta Somalia oo reer Somalilanad ah, sidii mudanayaashii iga horeeyay ay u sheegeen in ay ku soo xeroodaan dhamaan dadkiisi jooga muqdisho.

Ciidanka qaranka Somaliland waxa uu ku jiraa furimo waxaana la inooga baahan yahay dadka reer Somaliland in la is garabtaago, si ay u dareemaan in dadkoodu garantaagan yihiin, waxaan mar labaad bogaadinayaa ciidanka qarank ee duruuf kasta oo uu ku sugan yahay ugu dhabar adaygay in ay qarankooda difaacaan. Aad iyo aad ayaad u mahadsantihiin wasaalamu calaykum.

**Md: Axmed Yuusuf Nuur (Guruuje)** ***(6min, 13sec): -*** Bismilaahi Raxmaani Raxiim, marka hore waxaan ka hadlayaa saddex qodob oo koob-kooban, ugu horay waxaan wax ka odhanayaa hanaanka arrinkan loo marayo, waxay xildhibaano soo jeediyeen in labada gole ay mar wada ansixiyaan, hadii labada Gole wada ansixiyaan waxa uu noqonayaa Baaq aan awood lahayn, anigu waxaan qabaa in goleheenu ansixiyo golaha Guurtidana loo gudbiyo Madaxweynahana loo gudbiyo uu uu saxeeyo si uu saamayn sharci u yeesho. Hadii kale waxa uu noqonayaa baaqaa aynu maalin walba idaacadaha ka sii dayno oo kale.

Qodobadan ay gudiddu soo qortay waxaan soo jeedinlahaa in la habeeyo oo mawadiicda ay ka hadlayaan la qeexo, oo tusaale ahaan qodobka ugu horeeya ee soo baxayaa uu noqdaa mid aynu dawladaa Somalia u aqoonsanayno in ay tahay caday, taas ayay ka

dhalanayaan wixii tafaasiil ahi. Lakiin hadii aynu tafaasiisha ku filayno wax dhamaanaya maaha tafaasiishu, arrimahan oo kalana waxaa loo yeelaa dabar.

Qodobka 2aad waa in uu noqdaa go'aan ah kol hadii aynu cadaw u aqoonsanay dawladaa muqdisho waa in uu go'aan keenu noqdaa in xidhiidhadii oo dhan aynu u jarnay hadii ay tahay mid siyaasadeed, mid wada hadal iyo hadii ay tahay mid wada ganacsi cidii waxaa ku xaqgudubtaana waxay qodobadeedu ku qoranyihiin Xeerka Ciqaabta guud.

Qodobka 3aad ee aan ka hadlayaa waxa weeyi cidii ku xadgudubta go'aankaa in loo arko in ay ku talaabsatay fal-danbiyeed.

Qodobka 4aad waxaan soo jeedin lahaa in loo bandhigo beesha caalamka, waayo qadiyadi inaga oo kali ah inooma dhaxayso, waayo dadka muqdisho jogaa waxay haystaan qalimaanta beesha caalamkana waxay u qoraan waraaqo, beesha caalamkana culays ayay ku yihiin, Nabad-galyadoodii ayaa la sugaa, mushaharkoodii ayaa la bixiyaa oo miisaaniyada ayaa la siiyaa, halka Somaliland ay u tahay beesha caalamka Taageerayaal wax tara oo 1000km oo bad ah ayaynu ilaalinaa oo aynu cid walba ka ilaalinaa waxna kuma qaadano, sidoo kale nabad galyada gobolka waxaynu u nahay muhiim.

Markaa waa in aynu beesha caalanka tusnaa iyada oo badu dhinaca kale ka gubanayso in aanu bada cas ka ilaalino budhcad Badeeda, ma waxaa lanagu cadaadinayaa alshabaabta aanu buurahayaga ka ilaalino, ma waxaa la nagu cadaadinayaa dimuquraadiyadayada iyo Doorashooyinka, halka muqdisho lagu abaalmarinayo qaraxyada waa in ay dunidu cadaysaa in waxa la isku abaalmarinayaa uu yahay waxaa muqdisho ka dhacaya, oo aan la jeclayn waxyaabaha ayny ka shaqaynayno.

Qodobka 5aa ee aan soo jeedinayaa waa mid nimada umada, waxay soomaalidu ku maah-maahdaa "HAANI GU'NTA AYAY KA TOLANTAA' hadalkana in la is agtaago maaha waxaa kale oo ay soomaalidu tidhaa "AY IS CUNAYSAA YAY ISKAMA CELISO" hadii umada Somaliland magacyo loo kala bixiyo, hadii Somaliland quluubteeda la kala kexeeyo meela gaadhi mayno, waana in xadalada xanafta leh ee umada kala kaxaynayo la iska daayo halkana waxaa ka muuqata in hadalkaasi aanu xidhibaanada qaar aanu uba dhaadhicin, mudane Gudoomiye Xisbiga aan ka tirsanahay ee mucaarid ah ninka ugu da'weyni waa Ismaaciil X. Nuur ee maayirka ka ah Ceeri-gaabo ee Madaxweynaha iyo waftigiisa miyuu soo dhaweeyay mise muu soo dhaweyn, waa tii la arkayay isaga oo magaaladiisii iyo dadkiisii wata uu soo dhaweeyay, markaa marka la leeyahay waddani waxa uu doonayaa in wafiga madaxweynaha dhulku la go'o saw hadal dadka kala kaxaynaya maaha?.

Dadka reer Somaliland waa in Quluubtooda la mideeyaa oo dadka reer Somaliland ee inaga soo hor jeeda aynu laabta galino oo aynu soo dhawayno oo walaalnimadii iyo

qaranimadii iyo wax wada lahaanshihii ku soo celino. Sidoo kale dadka inaga maqani waa dadkii walaalkeen Xildhibaan Casoowe soo doortay waana in aynu ka daba tagnaa, sidoo kale waa in Somaliland laga daayaa waxa cadawga u nuglaynaya waanad mahadsantihiin.

**Md: Cali Xuseen Nuur** ***(5min, 37sec): -*** Bismilaahi Raxmaani Raxiim, gudoomiye waad mahadsantahay xildhibaanaduna way salaamayihiin, waa hadal dabadii intii ugu badnaydna waa la soo yidhi kaliya waxaa hadhay waa ururin, qadiyadan aynu ka hadlaynaa waa qadiyado taabanaya Madaxbanaanideena, nabad-galyadeena iyo wada jirkeena umadeed, marka ay sidaa tahay Golahan oo kali ahi maaha kii difaaci lahaa arrimahaa aan soo sheegay, waana mid uu qaranka oo dhami leeyahay (Golaha Fulinta, Golaha Baarlamaanka iyo dhamaan shacabka Somaliland) taas oo uu mid walba ka qayb qaadanayo qaybta kaga aadan ama uu ku leeyahay, waana muhiim aha marka dagaalo sidan oo kale ahi yimaadaan in aad sakaaga midayso.

Waa in marka ugu horaysa aynu ka shaqaynaa wada jirta shacabka jamhuuriyada Somaliland mid lawya-cado iyo ilaa halka ugu danbaysa, sida ay xildhibaanadii iga horeeyay sheegeen in aynu isku eedayno in aynu u kala dhawnahay Dawlada Somalia taas oo aad moodo in baryahan danbe ay soo badanayso waxaanan soo jeedinayaa in ay qodob noqoto qodobada inaga soo bixi doona oo la yidhaa taasi waa mid gabi ahaanba inaga reeban.

Qodobada kale ee inta badan lagu kala duwan yahay waxaa ka mid ah Doorasho ama Difaac midkeen qaadanaa, labadaa qodob oo ah mid dhamaanteen inagu waajib ah oo uu dastuurku ina farayo oo aan midna laga baxsan karin waana kuwo isku sidkan maanta oo hadii ay maalin wada dhacaana labadaba lawada galayaa oo gacana cadawga lagu difaacayaa gacana doorashada lagu galayaa.

Waxaan soo jeedinayaa: -

1. In soo jeedintii Gudidda Arrimaha Dibada Golaha Wakiillada iyo Ta Golaha guurtida ay soo diyaariyaan go'aanka iyo qaraarka baarlamaan ahaan la gaadhayo.
2. In ay keenaan labadaa guddi oo isku tagay qoraalka ay soo diyaariyaan laguna ansixiyo fadhi wada jir ah oo labada Gole yeeshaan.
3. in Madaxweynaha iyo Xisbiyada Qaranku isku tagaan oo hawshani maadaama oo ay tahay hawl culus oo handadaysa qaranimadeena, nabad-galyadeena iyo wada-jirkeena ay go'aan ka soo saaraan si la inoo arko in aynu dhamaan midaysanahay qadiyadan.
4. in aan madaxweynaha aan laga dareemin hilaab dagaal oo ah mid doorashada dib u dhigaya oo madaxweynuhu u cadeeyo umada in labadaasi isku sid kanyihiin.
5. in dhamaan golayaasha qaranku ay ka wada shaqeeyaan midnimada shacabka reer Somaliland oo ay ka ilaaliyaan ka qayb sanaata si aanu cadaygu inoo soo dhex galin.

**Md: Siciid Maxamed Ismaaciil (Sokeeye)** *(5min, 52sec): -* Bismilaahi Raxmaani Raxiim, ugu horayn waxaan aad iyo aad u soo dhawaynayaa Gudidda Arriamaha Dibada, Xildhibaanadii iga horeeyayna weedhahoodiina waan taageersanahay, waanan ku raacsanahay, sida uu ilaahau quraankiisa yidhi "QABSADA XADHIGA ILLAAHAY DHAMAANTIIN OO HA KU KALA DUWANAANINA" Sidaa awgeed arrin kasta oo la soo gudboonaada dadkeena waa in loo midoobaa sidii loo suulin lahaa.

1960-kii ayaynu gobonimadeedna aynu qaadanay, hadana 30-sanno ka dib ayay dib inoogu soo noqtay gobonimadeenii, iyada oo ina gaadhsiisay dagaal ku bexeen naf, maalba iyo wax kastaaba. Ka dib Dawlada Somaliland ayaynu dhisanay 1991-kii ilaa maaha mudo yar oo uu Madaxweyne Daahir Riyaale Xukunka hayay mooyaane intaa waxaa socday dagaalo af iyo adinba leh, mid dhaqaale burbur iyo kala furfurba leh.

Dhamaan waxyaabahaa aan soo sheegay, waxay u suurto galiyeen cidii inaga soo horjeeday in ay si cad oo aan gabasho lahayn dagaal inoogu soo qaadaan, sidaa awgeed waxaan labadii mudane ee iga horeeyay ku raacsanahay kamada ay ka dhawaajiyeen ee ah in hadii la raba in meel dagaal lagu qaado gudaheeda marka hore fur-fur iyo kala qayb sanaan lagu sameeyo, oo dabadeed midba gooni dhagta dabadeeda loogu dhufto, waana taala ee maanta sida riqiiska ah ee ka soo yeedhay raysal wasaaraha xamar ee maanta dadkeena kala qaybisay, taas oo ina tusaysa darajada fikirkeena siyaasadeed ee maanta wadanka yaalaa oo ina gaadhsiiyay in aynu isku canbaarayno gudaheena.

Waxaan ku soo gabo-gabaynayaa "WALAAQ KAMA DHEX BOXO HADAAN URURIN WAAYEEL" hadaynaan mucaarid iyo muxaafid ayaynaa u midoobin jiritaanka umadeena, walaaltinimadeed iyo wada jirkeena waxaa hubaal ah in aynu noqon doono kooxo iska soo hor jeeda oo mid walba goonideeda xayawaanku u cuno, laakiin hadii aynu mid ahano cid inagu soo dhiiranasaa ma jirto waana in umada la mideedyaa wasalaamu calaykum.

**Md: Fu'aad Axmed Diiriye** *(4min, 16sec): -* Bismilaahi Raxmaani Raxiim, Shir-gudoonka iyo Mudanayaashaba waan salaamayaa, maata waa maalintii qaranimada mana aha maalintii muxaafidka iyo maalintii mucaaridka, waxanan jeclaan lahaa in hoos loo dhigo wax kasta oo kala duwanaansho ah oo dhexdeena yaala.

Somalilanad waa Dawlada Madaxbannaan oo ku taagan Afti dadweyne iyo Dastuur, mana aha mid hareeraraha laga joogo oo Dastuur ku meel gaadh ah ku taagan, waana dawlad 33-jirsatay. Waxaan aamin sanahay in markasta oo dagaalka Koonfureed uu bato, waxaa wanaagsanaaday ama Xoogaysatay Dawladnimada Somaliland ee ha la yaabina. Umada Somaliland waxaa laga rabaa inay illaaliso wada jirkeeda iyo midnimadeeda oo muxaafid iyo mucaaridba u midoobaan qadiyadooda iyo qaranimadooda.

Dawlada Somaliland hore ayaa baddeeda iyo hawadeeda loogu soo duulay, hadama waxaa lagu soo duulay dhaqaaleheedii iyo noloshoodii markaa waa in la iska kaashado gacmahana la isqabsadaa, in wax la iska waydiiyaana waa arrin muhiin ah.

Waxaan aad iyo aad ugu bogaadinayaa Gudidda Arrimaha Dibada ee soo jeedisay go'aanadan dhaxal galka ah, ka gole ahaana waa in aynu weelayno kana dheeraano caadifada, waana in wada-tashi aynu ka samayno meelo badana aynu ka eegno si aynu u soo saarno go'aano dhaxal gal ah, oo aan dadkeena meel ay joogaanba ku keenin wax taban. dawlada Somalia waxaa maamula nin aad moodo in uu hurdo ka soo kacay, waayo waxaad ka arkaysaa taladooda iyo go'aanadooda, dadka dalkaa maanta hor joogaana waa qab-qablayaashii dagaalka, umada Somaliland waa mid ka kortay waxaa ay shubayaan, mid dhag u dhigaysana maaha waana mid qaranimadeed meel uga soo wada jeeda.

**Waxaan soo jeedinayaa,** In sidii uu soo jeediyay xildhibaan Maxamed Cismaan in guddi loo saaro si ay uga soo baaraan degaan uga soo falaanqeeyaan arrinkan, sidoo kalena waxaan soo jeedinayaa in uu noqdo arrinkeenu mid caadifad laga ilaaliayay aad iy aad ayaad u mahadsantihiin.

**Gudoomiye Giire;** waxaan aad iyo aad ugu mahad-naqayaa mudanayaasha qiimaha leh, sida masuuliyada, dareenka leh iyo dareenkaba leh ee aad u joogteen wakhtiga badan doodana uga qayb qaadateen iyo sida aad u muujiseen lexo-jeclada iyo dareenka aad umadiina iyo qarankiina u haysaan.

Sidoo kale, waxaan aad iyo aad idiinku hambalyaynayaa sida aad hoos ugu dhigteen kala duwanaanshihiiska, mudanayaal sida aad ka war qabtaan dagaalkani mudo ayuu soo socday ha ugu sii darnaado intii cuna qabataynta hubka laga qaaday'e oo sidii aynu wada arkayna uu hub farobadani uu dadka gacmahooda galay gaar ahaan Caabudwaaq, arrimahaa oo ah masuuliyada inoo yaal in aynu caalamka kala hadalo. Dhan kala waxaan u mahad-naqayaa gudidda Arrimaha Diba ee Golaha wakillada soojeedinteeda, waxaanan idinla qabaa go'aana inoo ah in aynu ka shaqayno qaranimada, sidoo kale waxaa inoo yaala sidii aynu doorashada iyo Difaaca qarankaba aynu uga shaqayn lahayn.

Ka gudoon ahaan waxaanu idinla qaadanay in aanu soo samayno gudi soo ururisa ananu ku wareejiyo hadalqoraalkii mudanayaasha iyo soo jeedintii gudidda arrimaha dibada labadaba ka shaqeeya oo inoo soo ururiya.

Sidoo kale waxaanu idinla qaadanay in go'aanada qaarkood ay ahaayeen qaar masiiriya oo labada Gole khuseeya in aanu ka hawlgalno shirgudoon ahaan oo aanu doono shirgudoonkii kale ee Golaha Guurtida si loo di yaariyo fadhigii wada jir ahaa, sidoo kale

gudidaa waxaanu ku xoojin doonaa garyaqaan kala shaqeeya arrimahan, waxanu isla caawa soo saari doonaa isla gudidaas.

Ugu danbayn waxaanu xukuumada u soo jeedinaynaa in wax kasta oo kala aragti duwanaansho ah hoos loo dhigo, qaranku meel u jeesto isku aragtina laga noqd aad iyo aad ayaad u mahadsantihiin fadhiguna wuu inoo xidhan yahay waa inoo barri hadii Alle idmo.

| | |
|---|---|
| **Cawad Cali Maxamed** | **C/risaaq Siciid Ayaanle** |
| **Ag. W. Shuruucda, Fadhiyada iyo Hadal-qoraalka** | **Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilladda JSl** |
| **-------------------------------------------------** | **-------------------------------------------** |